# XUSKA MAWLIIDKA

*Madmadowga loo daliishado*
*Xuska mawliidka Nebiga ﷺ*



*Turjumiddii:*

Sahal X. Maxamuud–Saylaci

# AFEEF

Waxa aan ka afeefanayaa –ka turjume ahaan, in aanay ii suura gelin in aan la xidhiidho sheekha dhiganahan aynnu soo turjunnay qoray. Dhawr isku day oo aannu samynayna arrinkaas kuma aanu guulaysan, waxaana sababay sheekha oo aan baraha bulshada ku lahayn degal u gaar ah oo lagala xidhiidhi karo –inta aan ka ogahay, si kale oo loola xidhiidhaana ay adag tahay. Sidaa darteed; wixii ka yimaadda turjumidda dhiganahan aniga ayaa masuuliyaddeeda qaadaya oo tuurta u ridanaya.

Waxa kale oo aan buugga ku daray hordhac aan u-arkay in akhristaha sharfan ee Soomaaliyeed aanu ka maarmayn, taasina waa siyaado jeebkayga ah oo aan ku kordhiyey.

# *Yaa maxabbo Nebi sheegtayoo, diidey marinkiisa*[1]

([1]): **Abwaanka Muwaxidiinta:** Abshir Nuur Faarax Weheliye (Abshir Bacadle).

Abshir waxa uu kamid yahay abwaannada hibadooda gabyaanimo ugu hiiliyey diinta Islaamka iyo caqiidada saxan, kulana diriray

baadilka iyo bidaca qaarkood oo ka jira meelo kamida geyiga soomaaliyeed. ALLE godka ha u-nuuro. **Turjumaha.**

# Hordhac

Dhiganahan waxa qoray: sheekh Calawi bin Cabdulqaadir as-Saqaaf, waxa uuna ku uruuriyey ilaa siddeed iyo toban-shubho, oo loo daliishado ama lagu difaco bidcada Mawliidka ee loo yaqaan xuska dhalashada Nebiga ﷺ.

Sheekhu waa qoraa, daaci, cilmi-baadhe, muxaqqiq/tafaftire, mushrifka/kormeeraha guud ee degalka durar as-saniyyah, sidaas uun usii wad… ALLE haka jasaa'i siiyo.

Haddaba waxa lays weydiin karaa: waa maxay shubhadu?

Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: "Xalaashu waa caddahay, xaaraantuna waa caddahay, dhexdooda se waxa ahaaday arrimmo isu eg/is shabbaha, in badan oo dadka ka mid ahina ma garanayaan, qofka iska ilaaliya shubahaadka, wuxuu la-beri noqdaa/dhawrtaa diintiisa iyo sharafkiisa, ruux kasta oo ku dhaca shubuhaadka, waxa uu ku dhacaa xaaraanta…".

Imam Axmed ibnu Xanbal waxa uu shubhada ku qeexay: "Waa meel u dhaxaysa xalaasha iyo xaaraanta" mar kalena waxa uu yidhi: "Waa in xalaashii iyo xaaraantii laysku walaaqo".

Marka la soo uruuriyo macnaha guud ee shubhadu: waa qofka oo kala saari waaya xaqa iyo baadilka, xalaasha iyo xaaraantuna ay iskaga dheehmaan.

Sidaa darteed; shubhadu waa shaygaa qofka uu madmadowgu kaga jiro, ee xalaal iyo xaaraan ay midna ugu caddaan weyday.

Qofka Muslimka ahi in uu ka xalaal miirto shubahaadka iyo meelaha ay wax kaga soo baydhi karaan; waa asal kamid ah usuusha diinta Islaamka.

Waxyaabaha shubuhaadka keena waxa kamida; in culumadu ay isku khilaafaan xukunka masalada, intaa kaddib ay badhkood xaaraantimeeyaan kuwo kalena banneeyaan, qofka-se iskaga dhaqma arrimo laga yaabo in ay culumada badankeedu xaaraantimeeyeen, waa qof aan ka xalaal miiran waxa uu ku dhaqmayo, sharaftiisa iyo cirdigiisina u bandhigay in wax laga sheego, haddii uu sii joogteeyo ama uu badsado ku dhaqanka arrimahaas madmadowgu ku jirana; xaaraantii caddayd in uu ku dhacaa iyana waa hubaal.

Nebiguna ﷺ mar uu waddada ka helay xabbad timir ah oo uu damcay in uu cuno, waxa uu yidhi: “Haddii aanan ka baqayn in ay tahay sadaqo, waan cuni lahaa”. Sabatuna waa in Nebiga ﷺ iyo aalu baydkiisaba ay xaaraan ka ahayd sadaqaddu, sidaa darted; Nebigu ﷺ waxa uu ahaa ka ummada ugu xalaal miiradka badan.

Mawduuca shubhaadkuna waa mid gudo ballaadhan oo nusuus badani ay ku soo arooratay, safxad iyo soddomeeyo safxadood toona loogama bogan koro, ee ciddii danaynaysaa ha ugu noqoto kutubta iyo meelaha ay culumadu ku faahfaahiyeen.

Ereyga turjumaha: Sahal X. Maxmuud-Saylaci

**Shubhada Koowaad:** Waxa ay daliishadeen aayaddan:

قُلۡ بِفَضۡلِ ٱللَّهِ وَبِرَحۡمَتِهِۦ فَبِذَٰلِكَ فَلۡيَفۡرَحُواْ ٥٨

***Ku dheh [Nebi muxammadow ﷺ]: Deeqda ALLE iyo naxariistiisa [oo ah Qur'aanka], taas haku farxaan mu'miniintu". Yuunus: 58.

Waxa ay ku macneeyeen [qolyaha Mawliidka banneeyaa] in farxadda ugu weyni ay tahay ku farxidda dhalashadii Nebiga ﷺ, qabashada mawliidkuna uu yahay dareenka lagu cabbirayo farxaddaas.

## Jawaabta:

Waa fassir aan laga soo werin mid qudha oo kamida imaamyadii muslimiinta, su'aashu waxa ay tahay markasta oo uu ALLAAH innagu galladaysto nimco, ma waxa aynnu ka dhigaynaa maalinkaas maalin aynnu dabbaal-degno?!

Intaa ka gadaal; deeqda iyo naxariista ALLE ee Laynagu amray aayaddan in aynnu ku faraxno; maba aha maalinta dhalashada Nebiga ﷺ, ee waxa looga jeedaa waa Qur'aanka, sida ay ka marag kacaysaba aayadda ka horreysa aayaddan, mana jiro mufassir kamida culumadii Qur'aanka tafsiiri jirey, oo sheegay macnaha ay aayaddan saareen, [in farxadda aayadda ku jirta lagu macneeyo ku farxidda dhalashada Nebiga ﷺ

**Shubhada Labaad:** Daliishiga ay daliishadeen aayaddan:

فَٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ بِهِۦ وَعَزَّرُوهُ وَنَصَرُوهُ وَٱتَّبَعُواْ ٱلنُّورَ ٱلَّذِيٓ أُنزِلَ مَعَهُۥٓ أُوْلَٰٓئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴿١٥٧﴾

*Kuwa [Nebiga ﷺ] rumeeya, weyneeya, u hiiliya, raacana nuurka [Qur'aanka] lala soo diray, kuwaasi waa kuwa liibaanay" Acraaf: 157.

Waxa ay sheegteen u dabbaal-degga dhalashada Nebigu ﷺ, in ay kamid tahay karaamayntiisa, qaddarintiisa iyo weynayntiisa.

## Jawaabta:

Aayadda kuma sugna waxa ina tusinaya u dabbaal-degga dhalashada Nebigu ﷺ, in ay u tahay weynayn iyo ixtiraam, wax kasta oo uu qofku u maleeyo in ay weynayn u tahay Nebiga ﷺ, ma aha in ay u bannaan tahay sameyntiisu malihiisa dartii, mana bannaana in Nebiga ﷺ lagu weyneeyo durbaanno la garaaco, ama in ammaantiisa lagu talax-tago sidii ay Nasaaradu ugu talax-tagtay ammaanta Nebi Ciise (NNKH), Nebiguna ﷺ ummadiisa wuu ka reebay arrinkaas, sidaa darteed; u dabbaal-degga Mawliidkuna ku talax-taggaa laynaga reebay ayuu soo galayaa.

**Shubhada Saddexaad:** Daliishiga ay daliishadeen Xadiisakan:

Nebiga ﷺ ayaa la weydiiyey soonka maalinka Isniinta uu soomo? Waxa uu yidhi: "kaasi waa maalinkii aan dhashay".

Waxa ay yidhaahdeen: soonkaas Nebigu ﷺ uu soomay waxa weeye dabbaal-deg uu u dabbaal-degay maalinkii dhalashadiisa!

## Jawaabta:

Tafsiirkan ay xadiiska saareen ma jirto cid sidaa tidhi oo culumada iyo shurraaxdii hore ee xadiiska kamid ah, mahad-naqa ALLE ee dhalashada Nebiga ﷺ, waxa uu noqonayaa in la soomo maalinkii la dhalay, waana maalin kasta oo Isniin ah oo kamida usbuuca/toddobaadka, sidii uu Nebiguba ﷺ sameeyey, kana dhigay sunno u baaqi noqonaysa ummadiisa ilaa qiyaamaha, mana ah dabbaal-deg, nashiidooyin iyo ammaano.

**Shubhada Afraad:** Daliishiga ay daliishadeen xadiiskan:

Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: "Maalmihiina waxa ugu fadli badan maalinka Jumce; maakinkaas ayaa la abuuray Nebi Aadam (NNKH), waana maalinkii la oofsaday, waa maalinka suurka la- afuufayo, badiya salliga aad igu sallinaysaan maalinkaas, maxaa yeelay salliga aad igu sallinaysaan waa laysoo ban-dhigayaa…".

Waxa ay yidhaahdeen: haddii uu Nebigu ﷺ uu inoo sharciyeey in aynnu ku sallinno maalinkii uu ALLAAH abuuray Nebi-Aadam, haddaba ku sallinta maalinkii la dhalay Nebigeenna-Muxammad ﷺ ayaa kasii mudan kana habboon. Waxa kale oo ay sheegteen; in dabbaal-degga dhalashadiisu uu yahay kulan Nebiga ﷺ lagu sallinayo.

## Jawaabta:

Haddii qaab daliishadkani sax ahaan lahaa, waxa aynnu arki lahayn saxaabada iyo kuwii ku xigay oo innooga hormaray ku gaar yeelidda maalinka Isniinta salliga Nebiga ﷺ, lamana hayo axad culumada kamida oo fadli gaar ah u- sheegaya salliga Nebiga ﷺ maalinka Isniinta ee uu dhashay, iskabaddaa in ay noqoto laba iyo tobanka Rabiicul Awwal oo aan sugnaynba' e.

**Shubhada Shanaad:** Shubhooyinka cajiibka ah ee ay sheegaan waxa kamida: Mawliidku muu ahaanin mooyee salliga iyo salaanta Nebiga ﷺ iyo ammaantiisa; haddaba maxaad noogu inkiraysaan salliga Nebiga ﷺ?

## Jawaabta:

Culumada diiddan dabbaal-degga Mawliidku, ma diiddana salliga Nebiga ﷺ iyo ammaantiisaba, si joogto ah ayay Nebiga ﷺ ugu salliyaan, balse waxa ay diiddan yihiin waa in kulammo iyo maamlmo gaar ah loo sameeyo salliga Nebiga ﷺ maxaa wacay; sunnaha Nebiga ﷺ kuma soo aroorin si sii daysan, xataa mar qudha ma sugnaanin in uu Nebiga ﷺ iyo saxaabadiisu ay kulmeen, saxaabada dhexdoodana ma dhicin in ay kulmaan si ay Nebiga ﷺ ugu salliyaan ama u-ammaanaan, iskabaddaa in uu habeen gaara ah noqdee.

**Shubhada Lixaad:** Xujaysiga ay xujaysteen xadiiskan:

Haweenay ayaa waxa ay ku nadartay in ay daf ka hor tunto kana hor geeraarto Rasuulka ﷺ; haddii uu ILAAHAY bad-qab kaga soo celiyo duullaankii Nebigu ﷺ uu ku maqnaa.
Nebiguna ﷺ waxa uu ku yidhi: “Haddii aad ku nadartay samee, haddii kale maya”.
Waxa ay yidhaahdeen: kaasi waa ixtifaal/dabbaal-deg iyo ku farxidda ka soo noqoshadii Nebiga ﷺ ee duulaanka, Nebiguna ﷺ waa taqriiriyey falkii ay haweenaydaasi samaysay, in se lagu farxo imaanshihiisi adduunyada ayaa ka-sii weyn!

## Jawaabta:

ALLE ayaa xume ka hufane, waxa ay daliishanayaan dhacdo qudha oo aan dib u dhicin noloshii Nebiga ﷺ oo dhan, waxa ayna iska indho tirayaan ka tegistii Nebiga ﷺ iyo saxaabadiisiba ay ka tageen u dabbaal-degga maalinta dhalashadiisa, lala qabo soo noqnoqdii badnaa ee maalinkaas.
Intaa ka gadaal; maxaa sababay in aanay ku nadrin gabadhaas saxaabiyadda ahi in ay xafladaysato oo ay faraxdo, maalintii Nebigu ﷺ uu adduunyada ku soo biiray, ee ay ugu nadartay maalintii uu duullaanka ka soo noqday isaga oo badqaba?!
Waa ta kale ee, dabbaal-deggeedu ma ahayn mid ay dadkii isugu yeedhay, waxa uu ahaa oofinta nadarkii ay ku nadartay, weyna oofisay nadarkeedi, haddii uu ahaan lahaana dabbaal-deg lamida debbaal-degga Mawlidka wey soo celcelin lahayd, sida ay sameeyaan xerta Mawliidku!

**Shubhada Toddobaad:** Waxa ay u daliishadeen bannaanshaha Mawliidka Nebiga ﷺ, xadiiska uu Bayhaqi ku soo wariyay sunankiisa, xadiiskaas oo laga wariyey Anas in "Nebigu ﷺ naftiisa ka walqalay markii waxyiga lagu soo rogay ka bacdi".

Intaa kaddib; waxa ay ku doodeen: waakaa Rasuulkii ALLE oo naftiisa ka walqalay isaga oo ku faraxsan dhalashadiisi, lala qabo in adeerkii abaa Daalib uu ka walqalay maalintii uu Nebigu ﷺ dhashay, arrinkaas Nebigu sameeyayna waxa ku sugan bannaanshaha soo celcelinta Mawliidka si isku xigxigta..

## Jawaabta:

Xadiiskan sida Bayhaqi laftiisuba sheegay waa xadiis *Munkar*[1] ah, Nawawi waxa uu ku odhanayaa kitaabkiisa (Majmuuca)[4378] waa xadiis *Baadil ah*, Ibnu Xajar al-Casqalaani waxa uu kitaabkiisa (Fatxi)[9/509] ku sheegay xadiiskan in aanu Nebiga ﷺ ka sugnaanin.

Sidaa daraaddeed; xadiiskan lamaba daaliishan karo asal ahaanba.

--------------------

([1]): Munkarku waa qayb kamida daciifka, daliilna ma galo oo axkaamta sharciga ah looma daliishado. **Turjumaha.**

**Shubhada Siddeedaad:** Daliishiga ay daliishadeen: xoreyntii Abii Lahab addoontiisi (th)suwaybah al-Aslamiyah xoreeyey, kaddib markii ay ugu bushaaraysay dhalashadii Nebiga ﷺ, intaa ka bacdina uu ka yareeyey ciqaabtii uu ku hayey.

Waxa ay yidhaahdeen: haddii kii Qur'aanka lagu dhaleeceeyey [Abii Lahab ayay ujeedaane] uu sidaa yeelay, addoontiisina ciqaabtii uu ka fududeeyey ku farxidda dhalashada/Mawlidka Nebiga ﷺ, maxay kula tahay ruuxa ku farxaya Mawlidka Nebiga ﷺ, isaga oo mu'min muwaxid ah oo ALLE keliyeelay.

## Jawaabta:

Maxaa ka xun in la daliishado fal uu sameeyay gaal jaahili ah, oo ku farxay dhalashada wiil uu walaalkii dhalay, weliba wakhti ay ahaayeen kuwo ku farxa caruurta kuwooda lab, noloshana ku aasa kuwooda dheddig iyaga oo ceeb ka baqaya, shubhadan waxa looga warcelinayaa wixii laga yidhi shubhaadkii ka horreeyay oo ah: dooddu kama taagna ku farxidda dhalashadii Nebiga ﷺ, jacaylkiisa ama weynayntiisa, waxa ay se dooddu ku aroortaa; sharcinimada waxa aad ku sheegteen jacaylka Nebiga ﷺ, aadna ku garab marteen hadyigii/sunnihii Nebiga ﷺ.

**Shubhada Sagaalaad:** Waxa uu Sakhaawi ku soo guuriyey kitaabkiisa (الأجوبة المرضية) (3/1117), mid iyaga kamid ahi in uu yidhi: haddii ay nasaaradu ka dhigteen habeenka dhalashadii Nebigooda [Nebi Ciise] ciid weyn, dadka muslimiinta ah ayaa uga mudan in ay sharfaan oo xusaan [dhalashada-Nabigooda ﷺ].

## Jawaabta:

Uma helayo bushinta dooddan wax kaga xeel dheer xadiiskii ay soo weriyeen Bukhaari iyo Muslim, Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: "Raacdeen oo raacdeen waddooyinka kuwii idin ka horreeyey (Yuhuud iyo Nasaaro) taako taako, dhudhun dhudhun, xitaa haddii ay galaan god masocagaley[1] waad ka daba galaysaan" saxaabadii waxa ay Nebiga ﷺ weydiiyeen: ma Yuhuud iyo Nasaaraada/kiristankaa? Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: "Oo yaa kale"?!

---------------------

([1]): xayawaanka xadiiska ku soo arooray waa xawayaan aad ugu eeg masacagalayda, balse ka duwan kana yar yar masacagalayda, lagana helo dhulka khaliijka iyo carabta. **Turjumaha.**

**Shubhada Tobnaad:** Markii uu-u-caddaaday kuwii la xamaasadaysnaa u dabbaal-degga dhalashada Nebig ﷺ, in uu-bidco yahay, waxa ay yidhaahdeen: Haa oo waa bidco, laakiin waa bidco wanaagsan, Ibnu Xajar-na waa tilmaamay in uu bidco wanaagsan yahay iyo qayrkii oo culumada kaleba ah.

## Jawaabta:

Sida saxda ah ee ay qabaan culumada kuwoda muxaqiqiinta ahi; waa in aanu jirin Iskaamka dhexdiisa wax la yidhaahdo bidco wanaagsan iyo bidco xun, ee bidcoo dhami waa mid lunsan oo baadi ku sugan sida ku cadba xadiiska saxiixa ah ee Nebiga ﷺ ka ansaxay.
Waxa u odhanayaa Abu Isxaaq ash-shaadibi kitaabkiisa (فتاويه) (S:180) “Hadalka Nebiga ﷺ ee ahaa “Bidco kastaa waa baadi” culumada agtooda waa mid lagu xanbaarayo caam nimadiisa, wax laga soo reebayaana ma jirto, mana jirto wax layidhaahdo bidco wanaagsan asal ahaanba”.

**Shubhada Kow iyo Tobnaad:** Waxa ay daliishadeen xadiiskan: Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: “Qofka Islaamka dhexdiisa sunneeya sunno wanaagsan, cidda ka danbeysaana ay kaga dayato oo ay sameyso, ruuxaas waxa u sugnaaday sunnadaas ajarkeeda, iyo cid kasta oo sameysa ajarkeeda; iyada oo aan waxba laga nusqaamin ajarkooda”. Waxa ay yidhaahdeen: u dabbaal-degga Mawliidku waa sunno wannaagsan.

## Jawaabta:

Waxa ay baddaleen macanihii saxda ahaa ee xadiiska, waxa ayna ka jaahil noqdeen ama iska jaahil yeeleen sababta uu xadiisku ku yimi, sababtaas oo ahayd: dad reer miyi ah oo maryo jeex jeexan sita ayaa Nebiga ﷺ u yimi, Nebiguna ﷺ dadkii [Saxaabadii iyo dadkii kale ee ka ag dhawaa] ayuu ku boorriyey in ay wax ku sadaqaystaan, dadkiina sadaqadda bixinteeda uma degdegin ilaa Nebigu ﷺ ka xumaaday, dabadeed waxa yimi nin ansaarta kamid ah oo jeex dahab ah ku sadaqaystay, dadkiina waa ku daydeen ninkaas, ilaa-Nebigu ﷺ ku farxay waxa ay sameeyeen.
Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: “Qofka Islaamka dhexdiisa sunneeya sunno wanaagsan, cidda ka danbeysaana ay kaga dayato oo ay sameyso, ruuxaas waxa u sugnaaday sunnadaas ajarkeeda, iyo cid kasta oo sameysa ajarkeeda; iyada oo aan waxba laga nusqaamin ajarkooda”.

Ujeedada xadiisku waxa ay tahay: Qofka soo nooleeya sunno kamida sunnooyinka Nebiga ﷺ, sida ku suganba werin kale oo ibnu Maaja iyo Qayrkiiba  ay soo saareen…

Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: "Qofka soo nooleeya sunno kamid ah sunnooyinkaygi aniga gadaashay la illaaway, waxa ugu sugnaaday ajar la mida cid kasta oo ku camal fasha, iyada oo aan waxba laga nusqaamin, ruuxa se soo derrisiiya bidco aan ILAAHAY iyo Rasuulkiisuba ﷺ ka raalli ahayn, kaasna waxa ugu sugnaaday denbi lamid ah cid kasta oo sameysa iyada oo aan waxba laga nusqaamin".

Shaadibi oo tacliiq/faallo saaray waxa uu yidhi: Sunno waxa halkan looga jeeda taas uu saxaabigu sameeyey, waana in lagu camal falo wixii ay sugnaatay in uu sunno yahay
–sida sadaqadda, Mana aha Mawliidka.

**Shubahada Laba iyo Tobnaad:** Waxa ay sheegteen in qaar-kamid ah saxaabadu, ay sameeyeen bidco wanaagsan, waxa ayna u daliishadeen xadiiskan:
[waxa uu yidhi saxaabiga xadiiska laga soo weriyay]: waxa aannu ahayn kuwo Nebiga ﷺ gadaashiisa ku tukanayay, markii Nebigu rukuucda uu ka toosay waxa uu yidhi:
"سمع الله لمن حمده".

Nin ayaa Nebiga ﷺ gadaashiisa ka yidhi: "ربنا ولك الحمد، حمدا كثيرا طيبا مباركا فيه"
Markii uu Nebigu ﷺ salaaddii ka baxay ayuu nagu soo jeestay dabadeed waxa uu yidhi: "kuma ayuu ahaa kii hadlayey"?
Ninkiibaa yidhi: aniga. Nebigu ﷺ waxa uu yidhi: "waxa aan arkay dhawr iyo soddon malag, oo usoo kala tartamaya kii noqon lahaa ka koowaad ee qora [ajarka ducadii saxaabigu akhriyey].
Waxa ay yidhaahdeen: saxaabigani waxa uu bidcaystay dikrigan oo aanu Nebigana ﷺ kama maqal, taasina waa bidcadii wanaagsanayd ee aanu sheegaynay.

## Jawaabta:
Horta fahankaasi waa fahan qaldan, saxaabada waxa u-sugnaaday dheeraad aan qayrkood u sugnaanin, dheeraadkaasina waa in Nebigu ﷺ dhexdooda joogay, saxayayna waxa ay sameynayaan, wixii uu saxaabigu sameeyo Nebiguna ﷺ uu-u-sugo, waxa uu sidaa kaga mid noqonayaa sunnooyinka uu Nebigu ﷺ sugay, bidacana ma aha sida ay taqriiriyeenba culumada Usuulku.
Waxa kasta oo ay soo weriyaan [qolyahaa Mawliidka bannaynaya] oo saxaabadu samaysay, Nebiguna ﷺ u sugay waxa uu la xukun noqonayaa masaladaas hore.

**Shubahada Saddex iyo Tobnaad:** Waxa ay daliishadeen kulmintii uu khaliifkii Cumar -ALLE haka raalli noqdee- uu- saxaabada ku kulmiyey salaaddii Taraawiixda hal imam gadaashii, geeridii Nebiga ﷺ kaddib.

Waxa ay yidhaahdeen: tanina waxa ay daliil u tahay bidcadii wanaagsanayd ee aannu sheegaynay.

## Jawaabta:

Ruuxa u fiirsada dhacdadan uu Cumar sameeyey, waxa uu ogaanayaa in daliishigoodu uu daciif yahay, maxaa wacay; Nebiga ﷺ ayaaba hore u sameeyey oo saxaabada tujiyey salaad Taraawiix si jamac ah weliba, intaa kaddibna Nebigu ﷺ habeennadii danbe uma soo bixin saxaabada, isaga oo uga tudhaya in salaaddan Taraawiixda lagu waajibiyo, xaalkuna waxa uu sidaa ahaa ilaa wakhtigii Abubakar Sidiiq, dabadeed Cumar ayaa soo celiyey markii ay meesha ka baxday sababtii markii hore looga tagay; oo ahayd in laysku faral yeelo, [dhimashadii Nebigii ﷺ kaddib iyo waxyigii oo go'ay].

Haddaba sidee loo odhan karaa Cumar ayaa bidcaystay salaad Cusub oo aan wakhtigii Nebiga ﷺ jirin? Xagguuse ka soo galayaa dhacdadan bidcada xuska Mawliidka ee diinta lagu soo kordhiyey?

**Shubhada Afar iyo Tobnaad:** Waxa kale oo ay daliishadeen camallo ay sameeyeen saxaabadu dhimashadii Nebiga ﷺ kaddib, sida qoristii Qur'aanka, ururintiisi, dhibcayntiisi iyo xarakayntiisiba. Waxa ay yidhaahdeen: arrimahaas oo dhami dhammaantood waa bidco wanaagsan, Mawliidkuna waa la-jaad oo kama foga.

## Jawaabta:

Bidcada xumi waa wixii aanu Nebiguﷺ samaynin, iyada oo ay jirto waxyaabihii keensan lahaa in uu sameeyo, iyo in uusan jirin wax diidaya in la sameeyo, haddaba muxuu yahay waxa Nebiga ﷺ u diideyay in uu sameeyo Mawliidka?
Haddii la yidhaahdo jacaylka Nebiga ﷺ ayaa keensanaya in la dhigo Mawliidka, saxaabaduba Nebiga ﷺ waa jeclaayeene maxaa u diidey in ay dhigaan Mawliidka?
Jawaabta ay usamayn waayeen waa Mawliidka oo aan diinta ka mid ahayn.

Haddii aynnu u nimaadno qoristii Qur'aanka iyo in hal musxaf lagu wada qoro; waxa ay ka ahayd dedaal iyo in laga dhawro in uu kala lumo, arrinkanna muu jirin xilligii Nebigu ﷺ uu-noolaa. Markii uu Nebigu ﷺ dhintay waxyigiina uu go'ay, qayb dadka kamid ahina ay isku khilaafeen aayado Qur'aanka kamid ah, taasi waxa ay keensatay in Qur'aankii la qoro oo hal kitaab laysugu geeyo, sidoo kale markii ay dadkii ka fogaadeen luuqaddii Carabida; ereyo cajam ahina ay ku badh-xameen afkii Carabiga, cajamtii badnayd ee Islaamka soo galaysay darteed, waxa ay u baahdeen in Qur'aanka loo dhibceeyo, si ay u-akhriyaan akhrin sax ah, taasna culumada Usuulku waxa ay ku magacaabaan maslaxo sii daysan. (المصالح المرسلة)

**Shubhada Shan iyo Tobnaad:** Waxa ay yidhaahdeen: Mawliidku waa caado iyo dhaqan ee ma aha cibaado; markaa maxaad noogu diideysaan samaynta caadooyinka/ dhaqanka?

## Jawaabta:

Tanina waa marin-habaabin ay dooddii majaraheeda kaga duwayaan iyo ka cararka waaqica iyo xaqiiqada, haddii aanay sidaa ahayn side loo odhan karaa kulamo koobsaday, akhrinta Qur'aanka, xuska ALLE, ducooyin, akhrinta siiradii iyo tilmaamihii Nebiga ﷺ, arrimahaas oo ay ALLE ugu dhawaanayaan, dadkana ugu yeedhayaan oo ku boorrinayaan, ayna ku tiriyaan camalladooda kuwa ugu waaweyn, ee ay ALLE kaga rajaynayaan ajarka iyo abaal marinta, side u-odhan karaan waa caado ee ma aha Cibaado?
Bal haddaba noo sheega cibaadadu waxa ay tahay?!

**Shubhada Lix iyo Tobnaad:** Madmadowga/shubahaadka ay ku bannaystaan dhigista Mawliidka waxa kamid ah: in ay Mawliidka ku shabbahaan qabashada bandhigyada lagu sharfayo caalim ummadeed, oo lagu muujinayo waxqabadkiisi laguna xusayo sooyaalkiisi iyo wanaagyadiisi.
Waxa ay yidhaahdeen: kulammadayada aanu kaga warramayno siirada Nebiga ﷺ, iyo fadligaa uu ummaddiisa ku leeyahay; ayaa ka mudan bandhigyadiinna.

## Jawaabta:

**Qodobka koowad:** Qabashada Nadwo ama kulan lagu baranayo siirada iyo shakhsiyaddii Nebiga ﷺ, ayaa ka mudan shaki la'aan barashada dadka kale, laakiin qabashada Nadwo ama kulan mar iyo wixii la halmaala ah, laguna qabanayo waddan ama dhawr waddan, sinnaba loogama qiyaas qaadan karo dabbaal-degga Mawliidka, maxaa yeelay; kulanka ama Nadwadu ma aha dabbaal-deg, farxad ama se damaashaad, loo yagleelay si dhalashadii caalimkaas loo xuso, waa uun qeexis iyo faalleyn loo sameynayo ciddii kaa jaahil noqotay sooyaalka caalimkan/aqoonyahan kan, iyo dedaalkiisi dacwadeed ee ugu baaqayey muslimiinta iyo qayrkoodba.

**Qodobka labaad:** Kulammadani malaha waqti go'an oo la qabto [sannad walba], saxna ma aha in lagu beego ama la qabto maalintii uu caalimkaasi dhashay, sababtoo aha ma aha kulmmadaasi ciido dhalasho oo caalimkaas u sugnaatay, mana aha mid xidhiidh la leh dhalashadiisi, waa hadba sidii u suura gasha kasoo qaybqalayaasha iyo qaban qaabiyayaasha kulankaas.

**Shubhada Toddoba iyo Tobnaad:** Waxa ay sheegteen kulammada loo qabto si dadka loo xasuusiyo siiradii Nabiga ﷺ iyo maalintii uu dhashay, in ay lamid tahay khudbadaha Jumcaha ee laysku baraarujiyo maalintiii Nebiga ﷺ la soo diray, Hijradiisi, iyo duullaankii Badar ee dhacay toddoba iyo tobankii bisha Soon-qaad/Ramadaan, iyo dhacdooyinka kale ee kamidka ah siirada Nebiga ﷺ ayay tanna lamid tahay, ee maxaad ku waasna ka hadalkooda u-xalaalayseen Mawliidka u xaaraan timayseen?!

## Jawaabta:

Tanina sidoo kale waa jaah-wareein kale, culumada bannaynaya in dadka la xasuusiyo Hijradii Nebiga ﷺ, soo saaristiisi iyo duullaannadiisiba ee ka sheegaya minbarrada maalinka Jumce, sidoo kale way bannaynayaan in dadka la xasuusiyo dhalashadii Nebiga ﷺ iyo dhimashadiisiba, labada masalana si isku mid ah ayay ugu khudbadeeyaan, wax kamida siirada Nebigana ﷺ ma diidaan, masalada laysku hayaana taas ma aha, halka laysku maandhaafay waa in laysugu yimaaddo xuska dhalashadiisa, laysugu yeedho, lana soo celceliyo wakhtiyo gaar ah, loona dabbaal-dego.

**Shubhada Siddeed iyo Tobnaad:** waxa ay yidhaahdeen: culumada badankoodu way bannayneeyaan u dabbaal-degga Mawliidka, waxase xaaraan timaynaya qolyo diinta isku adadkeeya oo xerta ibnu Taymiyya ah.

## Jawaabta:

Saddex qodob oo muhim ah aynnu isla fahanno si aynu u bushinno shubhadan:

**Qodobka koowaad:** Tix-gelintu waa xaqa iyo daliilka ee ma aha xagga loo badan yahay.

**Qodobka labaad:** culumadii hore ee muslimiinta sida afarta imaam iyo qayrkoodba, mid kamid ahna lagama soo werin in uu banneeyey Mawliidka ama uu sameeyey, sidee markaa loo odhan karaa: culumada badankooda ayaa bannaynaya?! **Qodobka saddexaad:** sheegashada ah ma-xaaraantimaynayaan –Mawliidka– xerta ibnu Taymiya mooyee culumada kale; waa sheegasho aan sax ahayn, waxa jira culumo fatwooday xaaraantinimada xuska Mawliidka, xerta ibnu Taymiyana aan ahayn mawlaciisana aan ka loox-jiidan. Waxa kamid ah culumadaas: caalimkii la odhan jiray Taaju diin al-faakahaani al-maaliki, waxa uu risaaladiisa la yidhaahdo (المورد في عمل المولد)[S. 60] ku odhanayaa: “uma ogi Mawliidkan wax asal ah oo ugu sugan kitaabka iyo sunnada midnaba... iskadaa 'e waa bidco ay keeneen qolyo camal waayey”. Waxa kale oo kamid ah culumdaas caalimkii usuul yahanka ahaa ee la odhan jirey: abu Isxaaq ash-Shaadibi, waxa uu kitaabkiisa loo yaqaan (فتاويه) [S. 203] ku odhanayaa: “Waxa layska garanayaa, qabashada Mawliidka dadka dhexdooda oo leh sifadana lagu yaqaan, in uu yahay bidco lasoo derrisiiyay, bidco kastaana waa baadi”.

# Gebogebadii:

Ruux ayaa laga yaabaa in uu yidhaahdo: waxa ay ummadu maanta ku jirtaa gebi-dhaclayn halistiisa wata, cadowgeedina waa kuwo jiho kasta kasoo kulaalaya, ummaduna uma baahna ka hadalka arrimha kala qaybinaya ee aan midaynayn.

Waa dhab oo ummaddu maanta waxa ay dhex galgalanaysaa haliso waaweyn, waxaana kamid ah: cadowga iskugu soo habar wacday, fiditaaanka bidaca, shubahaadka, munkaraadka iyo hawo raacnimada, sidaa darteed; waxa waajib ku ah kuwa-naasixiinta ah, in ay ummadda u nasteexeeyaan una digaan si ay ummadu u badbaado, iyo in lagu mideeyo Tawxiidka iyo sunnada, waxa ugu weyn ee ILAAHAY lagu caasiyo shirki gadaashiina waa bidcada, Ibliisna bidcada diineed ayuu ka jecel yahay macaasida, ALAAH-na xaqa ayuu ku hadlaa waana ka jidka toosan wax ku hanuuniya.

**Ugu danbeyn:** waxyaabaha in badan oo dadka kamid ah ka leexiya xaqa in ay aqbalaan, haba ugu muuqdo sida qorrax duhur joogta ‘e ka gadaal marka loo caddeeyo xujada iyo daliilada naqliga ah iyo kuwa caqliga ahba; in ay ku adkaato in ay ka taanaasulaan wax yaabihii ay sannadda badan caadaysteen, iyo in ay karaahiyaystaan in ay ka tagaan wixii ay aabbayaashood iyo awowyaashood ku dhaqmi jireen…

Waxa aynnu ALLE dheeraadkiisa iyo karamkiisa ku weydiisanaynaa, in uu innaga iyo idil ahaanba muslimiinta kale; uu ina tusiyo xaqa innaguna arsaaqo raacistiisa, iyo in uu

ina tusiyo baadilka iyo baadilnimadiisa, innaguna arsaaqo ka fogaanshihiisa.

Waxa aynnu ku ducaynaynaa ducadii Nebiga ﷺ:

RABBI-ga Jibriil, Miikaa'iil iyo Israafiiloow, ALLAHA abuuray cirarka iyo dhulalkoow, ALLAHA og waxa maqan iyo waxa joogaba, Adiga ayaa kala xukumaya waxa ay isku maandhaafaan addoomadaadu, nagu hannuuni waxa laysku khilaafaay kiisa xaqqa ah Idankaaga, Adiga ayaa ku hannuuniya cidda aad doonto tubta toosan.